
ILAYS WAA WARGAYS TODOBAADKII 2 JEER LAGU DAABACAY MADBACADDA HORYAAL BOSASO

# ILAYS

FEBRUARY 25 2009- Caddadkii 7aad, Tell:-90712246 ama 66712246 Email:-ilaysnewspaper1@gmail.com Q:-6000 Ssh

## CIMRAAN KHAN OO XORRIYADIISII HELAY



CIMRAAN KHAN OO KULA HADLAYA SUXUFIYIINTA HOTEL TROPICAL

Bosaso, 23,Feb,2008 Ilays

Cimraan Khaan oo ah Nin u dhashay Wadanka Bakistan balse Haysta dhalasho Ingriis ah ayaa helay Xorriyadiisa ka dib markii Koox burcad oo ka qafaasheen 22 february tuulada Laag ee gobolka Bari laga sii daayay.

Mr Khan,Waxaa u sheegay Saxaafada in uu aad ugu Faraxsanahay inaan Caawa (23,Feb) Joogo Bosaaso aniga shalay Subax lay Qafaashay, waxaan u Mahad Naqayaa dhamaan dadkii siidayntayda ka qayb qaatay si Gaar ah waxaan ugu Mahad Naqayaa, Wasiirka Arimaha Gudaha C/laahi Ilka Jiir , Wasiirka Amniga C/laahi Siciid Samatar iyo Odoyaasha oo Runtii dadaal dheer u Galay sidii aan si Nabad ah dib xoriyadayda ugu Heli lahaa, Runtii Maamulka Pl aad ayaan Mar labaad ugu Mahad Naqayaa" Ayuu Yiri Cimraan Khaan.

EEG BOGGA 2AAD


## Al-Shabaab Iyo Xisbul Islaam Oo Weeraray Amisom iyo Ciidamada Dowlada somalia.

### 45 Qof Oo Lagu Dilay Dagaaladii Ugu Danbeeyay Ee Xamar ka Dhaca

Tallaado, 24 feb, 2009







''Labadii dhalinyarada Al-shabab ka mid ahaa ee fuliyey is qarxinta. Iyo xaruntii Ciidamada Brundi ee la Qarxiyay''

EEG BOGGA 4AAD

Madaxweynaha PL:- Waxaan Howlgelinayaa Ciidamadii Daraawiishta

P.2



Waiirka Arrimaha Gudaha oo Waraysi Siiyay Wargayska Ilays

P.3



Dawaahiri Oo Warqad U Diray Muqdisho iyo Shariif

P.2



Sharma'arke:-Sidee Loo ArkayXukuumada uu Soo dhisay

P.4



Golis
The best Choice

GOLIS TELECOM SOMALIA
Marketing Dept.
LANDLINE FEATURES

Golis
The best Choice

Halkan waxaan Macaamiisha Sharafta leh ugu soo gudbinaynaa features line-ka shirkada Golis lee yahay. Eeg Bogaga 2aad

## Dawaahir: Ayaa Fariin u Diray Muqdisho iyo Madaxweyne Shariif

23,feb,2008 Al-jazeeraTV

Hogaamiyaha Labaad ee Ururka Al-Qaacida Ayman Al-Dawaahiri ayaa dhanbaal fariin ah u soo mariyey Madaxweynaha Soomaaliya Shiekh Shariif Sheikh Axmed Telefishanada Satalaaytka Caalmka qaarkood .
Waxaa uu Ayman Al-Dawaahir hal ku dhig uga dhigay Fariintiisaas Ka Timid Kaabul Ku Socota Muqdisho.

Waxaa uu sheegay oo aad uga hadlay Dawlada lagu so dhisay Jabuuti. Isagoo uga digay shacabka Soomaaliyeed inaan lagu khiyaamayn dasturka aan ku dhisnayn Islaamka ee jabuuti looga keenay. Waxaana uu ku tilmaamay dawlada Cusub mid u heelan noqonaysa doonitaanka dawlada Maraykanka.

Ayman Al-Dawaahir waxaa dhinaca kale uu amaan u diray Kooxda Al-shabaab. Waxaa uu sheegay inay Al-Shabaab guulo gaareen. Isagoo markale Shariifka iyo Xukumadiisa uga digay inaanay isku dayin inay burburiso guusha ay gaareen Al-Shabaab.

Ilays Newspaper founder 1991.
Abdi Shakuur Mire Aadan

Managing Editor
Omar said Mohe'd
712246

Design and Layout
Omar said Mohe'd

Reporters
Cali Ibraahim Qoobay
723424

Bashiir M.M
711613

# Cimraan Khan Oo Helay Xorriyadiisii

Bosaso, 23,Feb,2008 Ilays

Cimraan Khaan oo ah Nin u dhashay Wadanka Bakistan balse Haysta dhalasho Ingriis ah ayaa helay Xorriyadiisa ka dib markii Koox burcad oo ka qafaasheen 22 february tuulada Laag ee gobolka Bari laga sii daayay.

Mr Khan,Waxaa u sheegay Saxaafada in uu aad ugu Faraxsanahay inaan Caawa (23,Feb) Joogo Bosaaso aniga shalay Subax lay Qafaashay, waxaan u Mahad Naqayaa dhamaan dadkii siidayntayda ka qayb qaatay si Gaar ah waxaan ugu Mahad Naqayaa, Wasiirka Arimaha Gudaha C/laahi Ilka Jiir , Wasiirka Amniga C/laahi Siciid Samatar iyo Odoyaasha oo Runtii dadaal dheer u Galay sidii aan si Nabad ah dib xoriyadayda ugu Heli lahaa, Runtii Maamulka Pl aad ayaan Mar labaad ugu Mahad Naqayaa" Ayuu Yiri Cimraan Khaan.

**Wasiirka Amniga PL**
Wasiirka Amniga C/laahi Siciid Samatar ayaa isna Hadlay ayaa u Hanjbay dadkii Falkaasi Afduubka ah Gaystay, Samatar ayaa Yiri" Uma dul qaadandoono Falalka Maalin kasta ka dhacaya Magaalada Laag, wixii Afduub ka dhacay Pl waxa laga soo Maleegay Magaalada Laag, Xukuumada Puntland mar danbe dul qaad uma Yeelandoono Arimahaasi, oo kale hadeerna Afduubka Ninkan Waxaan ku soo Furan lahayn Xoog laakiin Nasiib wanaag Odayaasha Deegaanka ayaa Naga Dalbaday inaan Bal iyaga Ka war sugno"
"Gal Gala Hadeer waxaa Maamulku Puntland u waday in Saldhig Ciidan laga dhiso, sidoo kale Degmo ayaa la siin lahaa, Laakiin Waxaasi oo dhan waxay ku Waayayaan, Afduubyada ay Gaystyaan Wiilasha Yar Yar ee Jooga Gal Gala"Waan iidiin Digaynaa Reer Gal Gala Runtii odayaasha Magaalada waa kuwa Nabad Jecel Laakiin ma aqaan Meesha wax ka Jiraan"Ayuu ku Ku Ce Celiyay Gen-Samatar.

Wasiira Xanaanada Xoolaha

Wasiirka Xanaanada Xoolaha iyo Beeraha Mudane Doonyale oo ka mid ah Masuuliyiintii Ninkaasi ka soo Furtay Dablaydii Qafaalatay. Doonyaale ayaa xusay in dadka Deegaanka Gal Gala ay Yihiin dad Nabad Jecel isla markaana ay la shaqeeyaan Tan iyo intii ay wadeen Dadaalkaasi, Mr Doonyaale ayaa si Faah Faahsan uga hadlay Afduubkii Ninkaasi uu sheegay inay Qafaasheen dhalinyaro Cadhootay.

Waxaa kaloo ka hadlay arrinta afduubka Amir khan Wasiirka Arimaha Gudaha C/laahi Axmed Jaamaca iyo Wasiirkii horre Xannaanada Xoolaha Cali buureed, waxaana uu sheegay in Puntland ay ka aaminsan tahay Tuulada Galgala goob lama galaan ah, Balse dadka degaanku ay yihiin dad nabad jecel, waxaana uu intaas ku daray in sheekha lagu magacaabo Maxamed Siciid atab uu si wacan ula shaqeeyay siidaynta ninkaas, islamarkaana uu ku howlan yahay la dagaalanka burcada.

Hase yeeshe Xukuumada puntland ayaa Sheekh Maxamed siciid atab ku tilmaamta Nin Argagixisada la shaqeeya, kuna tababara,

Arrintu siday doonta ha ahaatee, odoyaasha iyo xukuumada puntland waxay ku guulaysteen in soo sii daayaan ninkaas muslimka ah ee martida u ahaa puntland, waxaana laga yaaba burcadu in ay iswaydiiyaan Diinta la afdubaha inta aysan ku dhaqaaqin fal afduub Mustaqbalka

## Madaxweyne FaroolO:- Waxaan Dib u Howlgelinay-aa Ciidamadii Amniga

Galkacayo,23,feb,2008 Allpuntland
Madaxweynaha Puntland C/rixmaan Maxamed Faroole oo Safar shaqo ku jooga Xarunta gobolka Mudug ee Magaalada Galakacayo ayaa ku dhawaaqay in Xukuumadiisu ay dib u dhisi doonto Kaabayaashii Dhaqaalaha ee puntland.

Madaxweyne Faroole waxaa uu sheegay in dib u Howlgelin doono ciidamadii Daraawiishta Puntland si loo Abuuro Amaan iyo Degaansho la'isku Halayn karo

Madaxweyne Faroole markii uu soo gaaray Magaalada Gaalkacyo wuxuu wada hadalo la yeeshay Isimada gobalka Mudug, wuxuuna kala hadlay xaaladaha amaanka, Dhaqaalaha iyo Siyaasada ee ka jira gobalka Mudug.

Faroole ayaa usheegay Odayaasha dhaqanka in uu yimid ka shaqeynta nabadgalyada gobalka Mudug, wuxuuna tibaaxay in loo baahan yahay in ay Dadka gobalku ka shaqeeyaan sida ugu wanaagsan ee loo xalin karo waxkasta oo ka jira Gobalka, isla markaasna ay soo gudbinayaan taladooda ku aadan xaalada gobalka.

Madaxweynaha & Wafdigiisa oo ay ka mid yihiin Gudoomiyaha baarlamaanka Puntland C/rishiid Maxamed Xirsi iyo Wasiiro ayaa la kulmay sidoo kale Maamulada degmooyinka iyo gobalka Mudug, wuxuuna kala hadlay xoojinta howlaha Dawladda ee gobalka.

Saraakiisha ku dhow dhow Kulamadaasi ayaa usheegay AllPuntland in uu Madaxweyne Faroole usheegay Xubnaha dawladda in ay shaqada ay hayaan ay dar-dargaliyaan, isla markaasna ay qorshayaasha cusub ee dawladda Puntland ay hirgaliyaan oo ay wax ka qabtaan gobalka.

GOLIS LANDLINE FEATURES

*Call forwarding*
Si aad line-kaaga ugu xawishaa Mobile-kaaga Gacanta fadlan raac habkan:
Active :*57*number-kaaga # Deactivete:#57#

*Callwaiting*
Si aad line-kaaga ugu samayso adeegan: Fadlan garaac *58#
Sidee laysaga xiraa adeegan #58#

Callback on busy
Sidee kuu soo wici karaa line aad rabtey oo mashquul kaa noqday markale adiga:
Fadlan garaac *59# marka line-ka la dhigo ayuu adiga ku soo wacayaa :

*Ogaansha waqtiga*
Fadlan garaac: #*32
Wakeup time
Sidee line-ka guriga ama xafiiska kuu yaal aad ugu buuxsan kartaa waqatiga aad rabto ee aad balanta leedahay:
Fadlan garaa *55* iyo saacada aad rabto oo ah habka 24saac
Tusaale: 1300# sidoo kale waxaa loo tirtiraa adeegan #55#

CALLCONFERENCE

Sidee loo isticmaalaa three party call And Mobile Conference
Fadlan garaac Number-ka aad rabo marka uu kaaqabto Hold-geli hadan midkale garaac isaguna markuu kaaqabto hold-geli hadana midkale garaac kadib taabo call-conference
hadaad rabto in aad isticmaasho Landline three party call garaac numberkaad rabto kadib taabo carabka hadana garaac number kala hadana taabo carabka hadana taabo nubberka sadex saas waxaad ku helaysaa dhamaan dadkaad rabtay

Sidee E-mail looga dirsan karaa Mobile-kaaga Gacanta

Fadlan tag tax-massege dabaeed geli 111, dabadeed message-ka ku qor halka loogu talagalay ee message-ka lagu qoro adigoo ka hor marinaya cinwaanka aad rabto in aad u dirto tusaale qurux@hotmail.com geele@gmail.com
dabadeed dir fariinta.
NB: dal iyo Dibadba waa isku mid

# WASIIRKA ARIMAHA GUDAHA EE PUNTLAND OO WARAYSI SIIYAY ILAYS

Wargayks Ilays waxaa uu waraysi la yeeshay Wasiirka Arrimaha Gudaha puntland Gen. C/laahi Axmed Jaamaca (Ilkajiir)

Wasiir C/laahi oo dhowaan Safar ku tegay dalka yemen ayaa siisay waraysi ku koobnaa Waxqabada Wasaarada Arrimaha Gudaha, waraysigiina waxaa uu u dhacay sidan:-

**Ilays:-** Maxaa u Qabsoomay Wasaarada Arrimaha Gudaha ee Puntland Mudadii Aad xilka Haysay?

**Wasiirka**:- Intii aan xilka hayay, Waxyaalo badan ayaanu qabanay, gaar ahaan Caasimada Garowe oo Xaga Maamulka ah, wax badan oo Weli Qorshaheeda aanu ku guda jirno oo aan Heerkii fulinta gaarin ayaa jiray. Markaa Howshu waa curdin. Laakiin haddaan soo kooba waxaa aanu qabanay waxaa ugu muhiimsanaa Nabadaynta beelaha oo khilaafyo Beelaha soo kala dhexgalay aanu xallinay.

Mudo labo todobaadna waxaan ku maqnaa Dalka yemen oon ka mid ahaa Wafti heer Wasiiro ah oo puntland oo aanu ku tegnay Dalka yemen oo aan kaga qayb galnay shir ka dhacay wadankaasi, Aniga iyo Wasiirka Amniga Puntland C/laahi Siciid Samatar, waxaanu la kulanay Wasiirka Arrimaha Gudaha ee yemen, waxaanuna kasoo wada hadalnay xiriirka iyo Wax wada Qabsiga Punland Iyo Yemen.

Markaa, Isma bogaadinayno, Howshuna waa bilow, Laakiin waxaan isleenahay wax waad qabateen??

Ilays:- Warbixin uu soo Saaray Maamulkii Hore, waxay ku sheegeen in Hoos dhac weyn ku yimid Howlaha Wasaaradaha Labadii Sanno ee la soo dhaafay, Wasaarada Arrimaha Gudaha Xaalkeedu Waa side??

**Wasiirka**:- Wasaarada Markii aan la wareegay, Cidna May soo shaqo tegi jirin, waxaa jiray shaqaale Maqane-Jooge ah, Laakiin Hadda Nidaamkii shaqada ee Wasaarada wax weyn baanu ka bedelnay, Qofka shaqaalaha ah 7:30 subaxnimo ayuu shaqada soo galayaa, waxaana uu ka baxayaa 1:30 duhurnimo, waxaanu sameenay Diiwan Gelin qofku Marka uu shaqada soo galayo iyo Marka uu ka baxayo, Anigu ka Wasiir ahaan xilliga Shaqada la soo galayo iyo Xiliga laga baxayo waan joogaa. Muhiimaduna waxay tahay in Qofkastaa uu Wajibaadkiisa shaqo guto oo aanu noqon qof iska maqan oo mushahar soo doonta.

Wasaaradu Waa Ballaaran tahay, Markaa Waxaan ku Mashquulsannahay in Waax kastaa oo Wasaarada ka mid ah ay shaqayso, oo howlihii loo igmaday ay ka soo baxdo,

**Ilays:-** Howlaha Wasaaradaada Looga Fadhiyo waxaa ka mid ah Horumarinta Gobolada iyo Degmooyinka gaar ahaan dhinaca Maamulka, Maxaa Idiinka Qorshaysan Arrimahaas??

**Wasiirka**- Horumarinta Goboladu Waa arrinta ugu Muhiimsan, Haddii aan gunta Hoose laga soo dhisin, oo aan Tuulada, Beesha iyo Degmada laga soo dhisin waxba ma Hagaagayaan, Dalka Dakhliguusuna wuxuu ku dhisan yahay waa degaanka, Degmaduna iyadaa soo saarta dakhliga, Markaa Haddii aan Degmooyinkii la dhisin oo goleyaashii iyo Sendikayaashi loo dhisin, oo kuwa hadda jirana aan la hirgelin oo la wanaajin, waxba ma hagaagayaan, taasina waxay u baahan tahay Waqti badan, Waxay u baahan tahay in la tago dhamaan Gobolada iyo Degmooyinka oo la joogo, xalna laga gaaro, Miisaaniyada loogu talo galo, Ma aha in Kormeer uun lagu tagaa.

Waxaa jira Qorshe aanu Madaxweynaha Hordhigi doono oo ah In la is qaybiyo oo Madaxweynaha iyo Madaxweyne Xigeenka ka wada Tashano oo gudiyo Heer Wasiir ah la sameeyo, Ma aha oo keliya Aniga iyo Wasiiro ku Xigeenadayda, Waa in Wasaarada Kasta ay tegto Gobolada iyo Degmooyinka. Oo 6 Billoodba mar kormeer la soo sameeyo oo la xalilo dhamaan dhibaatooyinka ka jira 7 Gobol ee puntland ay ka kooban tahay.

Laakiin, Ka Wasaarad Arrimo Guda ahaan, anaga Waajib bay nagu tahay in aan Hormarino Gobolada iyo Degmooyinka, Qorshahana way iigu jirtay .safar ayaa iga soo dhexgalay, si dhaqse ahna Waqtiga dhow Haddii Eebe Ogolaado waanu billabi doona inkastoo ay ku xiran tahay Hadba Misaaniyada loo hayo.

**Ilays:-** Waxaa Maalmahan Soo Ifbaxayay khilaaf u dhaxeeya Golaha Degaanka Bosaso iyo Duqa Magaalada oo ku Saabsan Xoghayaha Dowlada Hoose, Maxaad kala socotaa Arrintaas?

**Wasiirk**a :- Anigu Ma Maqal khilaafkaas, Laakiin Khilaaf waa jiri karaa, waana Xaajo ugub, , Markaa anaga ka Wasaarada ahaan Waqtiga aanu soo gaarnaa Waa waqti Dambe, Marka horre iyagaa (Golahooda Joogtada iyo Kuwa aan Joogtada ahayn) ayaa xaliya khilaafka dowlada Hoose, wixii ay xalin waayaana u gudbinaya Gobolka,Haddii Gobolka iyo Golaha Degaanku xalin waayo khilaafka, markaa ka dib ayay wasaarada soo dhexgashaa oo go'aan ka qaadata, welise anaga waxna soo gaaray ma jirto. laakiin goleyaasha Degaanka Qaarkood Waqtigii baa ka dhamaaday, Qaar waqtigoodii waa dhowyahay, Qaarna way cusub yihiin, waxaana la gaaray waqtigii Degaamada Qaarkood dib loo soo xuli lahaa.

**Ilays:-** Howla Farabadan ayaa ku horyaala, Rajo Intee leeg ayaad qabtaa?

**Wasiir**:- Bilow fiican ayaa socda, Rajo weyna ayaanu Qabnaa.waxaana Rajaynayaa in dadweynaha ka faa'iidaystaan dowlada, Dowladi keligeed waxba ma qabato, Anagu Adeegayaal ayaanu Nahay, Dadweynaha iyo Dowlada oo isku duuban baa wax qabta, Wixii ay noo dhiibtaana aanu Caddaalada ku maamulno, Sinnaan ku samayno, Hantidooda u ilaalino oo aan la dhicin, Qofkii dhaca, Hanti bursi sameeyna tallaabo laga qaado, Markaa dowladu waa ilaaliye, shacabkuna waa ilaaliye, Labada Qole waa is ilaashanayaan. Wixii xuna waa la toosinayaa, Wixii wanaagsana waa la dhiirigelinayaa

---

# Al-Shabaab Ayaa Weeraro ku Ekeysay Ciidamada AMISOM.

(Al-Shabab waa la kulmaynaa Cu'limada Masaa-

Ilays, 22,feb,2009 Muqdisho

Weerar si gaar ah loo soo qorsheyey ayaa xoogaga Al-Shabaab ku ekeysiiyeen xaruntii Jaamacadii hore Soomaaliya ,oo fariisin u ah ciidamada Burundi,kuwaas oo qayb ka ah ciidamad AMISOM. Sida uu saxaafada u sheegay Af-hayeenka Al-Shabaab Sheikh Mukhtaar Roobow. Waxaa uu xaqiijiyey in urur diimeedka Al-Shabaab iyagu fuliyeen qorshahaas ismiidaaminta ahaa ee lagu weerarar ciidamada Burundi.

Waxaa kaloo uu sharaxaad ka bixiyey sida falku u dhacay. Isagoo carabka ku adkeeyey inuu qorshahaasi sidii loogu tala galay u fulay. Waxaa uu hadalkiisa ku cadeeyey in markii hore uu gudaha halka ay degan yihiin ciidamadda Burundaydku uu u galay Axmed Sheikh Fiidow isagoo xiran jaakada ay ka buuxaan waxyaabaha qarxa. Is qarxintiisii ka dib ayaa waxaa isaguna gaari ay ka buuxaan waxyaabaha qarxa la soo galay Mursal cabdinuur Maxamed (Sheg-Shegow) oo isaguna dhawrayey falka is miidaaminta ah ee uu fulinayey saaxiibkiis. Intaas ka dib ayaa waxay Al-Shabab Hoobiyayaal ku garaaceen fariisinkaas ay la beegsadeen is qarxinta.

Weeraradaas ayaa waxaa lagu dilay 11 ka mid ahaa ciidamada Burundi iyadoo dhaawacooduna kor u dhaafay 15 Askari oo qaar ka mid ahi uu dhaawacoodu halis ahaa.

23 Feb 2009 ayaa waxaa maydadkii iyo dhaawicii CiidamadA Burundi waxaa loo duuley Nairobi si loo sii gaarsiiyo dalkoodii.

Egrayga Midowga Afrika ugu qaabilsan Soomaaliya Nicolas Bwakira ayaa ku tilmaamay weerarka loo geeystay Ciidamada Amisom mid bahalnimo ah oo uu ka dambeeyey Al-Shabaab, waana khasaarihii ugu weynaa ee hal mar loo geysto CiidamadaAmisom tan iyo markay cagaha soo dhigeen Soomaaliya.

Sheikh Mukhtaar Roobow ayaa ka dhawaajiyey in weerarkaasi uu ahaa bilowgii werarada, Al-Shabaabna waxay qorshaynayso weeraro ka culus midkaas ay dhowaan u geysan doonto Amisom. Waxaa kaloo uu Mukhtaar Roobow xaqiijiyey inay la kulmayaan C'ullimada loogu yeero Musaalaxada ee ka kala yimid dalka gudihiisa iyo dibadiisaba.

Ururka Al-Shabaab ayaa ahaa garabkii hubaysnaa ee Maxkamdihii Islaamiga oo uu waqti gudoomiye u ahaa Sheikh Shariif Sheikh Axmed oo iminka ah Madaxweynaha Dawlada midnimada Qaran, Al-Shabaabna waa ururka ugu awooda roon kooxaha hubaysan ee ka soo horjeeda dawlada dhowaan lau soo dhisay Jabuuti.

Dhinaca kale Madaxweynaha Midnimada Qaran Sh.shariif sh.Xasan oo Muqdisho Gaaray ayaa Canbaareeyay Weerarkii Lagu Qaaday Ciidamada Midowga Afrika.waxaana uu sheegay in ciidamadan ay u Yimaadeen somaliya in ay Caawiyaan dadka somaliya.

FAALO

# Sharmarke: Sidee Loo Arkaa Xukuumadda Uu Soo Dhisay?

Maqribnimadii Jimcaha oo ku beegnayd 20 Feb 2009 ayuu Ra'iisul Wasaare Cumar Cabdirashiid waxaa uu ku dhawaaqay Xukuumadiisii laga filayey inay noqoto midnimo Qaran. Aad iyo aad ayaa loo dhowrayey nooca ay noqonayso Xukumadaasi iyo xubnaha ka mid noqondoonaba. Hase ahaate waxaa uu Ra'iisul Wasaare Curmar Cabdirashiid waxaa uu daaha ka qaaay xukumadiisii ka kooban 36 Wasiir, waxayna noqotay sedan.

1-Raysalwasaare ku xigeen ahna Wasiirka Wasaaradda Kallumeysiga iyo Khayraadka Badda: Prof. Cabdiraxman Aaden Ibraahim Ibbi 2. Raysalwasaare ku xigeen ahna Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda: Shariif Xassan Sheikh Aaden 3.Raysalwasaare ku xigeen ahna Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Shiidaalka: Cabdiwaaxid Cilmi Goonjeex 3-Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda: Maxamed Cabdullaahi Oomaar 4-Wasiirka Wasaaradda Gaashandhigga: Maxamed Cabdi Gaandi 5-Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Iskaashigga Caalamigga: Cabdiraxman Cabdishakuur Warsame .6-Wasiirka Wasaaradda Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka: Madoobe Nuunow Maxamed. 7-Wasiirka Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Diinta: Sheikh Nuur Cali Aadan 8-Wasiirka Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Qoyska: Fowsiya Maxamed Sheikh 9-Wasiirka Wasaaradda Dhaqan Celinta iyo Naafada: Maxamed Cali Ibraahim. 10-Wasiirka Wasaaradda Gargaarka Aadamiga: Maxamud Cabdi Ibraahim 11-Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta: Farxaan Cali Maxamud. 12-Wasiirka Wasaaradda Cilmibaarista iyo Teknoolojiyada: Maxamed Cali Xagaa . 13-Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka: Qamar Aaden Cal. 14-Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha: Maxamed Cabdi Xayir (Mareeye). 15-Wasiirka Wasaaradda Jaaliyadda Dibadda: Cabdullahi Axmed Cabdulle Azhari.16-Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta: Axmed Cabdullaahi Waayeel. 17-Wasiirka Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyenta: Maxamed Cabdi Yuusuf. 18-Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Reer Miyiga: Khadiija Maxamed Diiriye 19-Wasiirka Wasaaradda Isboortiga iyo Dhallinyarada: Saleeban Colaad Rooble 20-Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha : Cabdulqaadir Cali Cumar. 21-Wasiirka Wasaaradda Amniggga Qaranka : Cumar Xaashi Aaden. 22-Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha: Abuukar Cabdi Cusman 23-Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Garsoorka: Cabdiraxman Maxamuud Faarax Janaqow. 24-Wasiirka Wasaaradda Beeraha: Xasan Maxamed Nuur (Shaati-Guduud). 25-Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda: Maxamed Ibraahim Xaabsad e. 26-Wasiirka Wasaaradda Hantida Qaranka iyo Qalabeynta: Maxamed Mursal. 27-Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare: Prof. Ibraahim Xassan Caddaw. 28-Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha: Cabdalla Boos Ahmed . 29-Wasiirka Wasaaradda Dib u Dhiska: Xussein Ceelabe Faahiye. 30-Wasiirka Wasaaradda Dalxiiska iyo Duur Jooga: Maxamed Xuseen Saciid. 31-Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta: Cabdirazak Cusman Juurile. 32-Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga: C/rashiid Maxamed Cabdi (Cirro). 33-Wasiirka Wasaaradda Warshadaha: Cabdiraxman Jaamac Cabdalla, 34-Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka: Cali Jaamac Jangeli. 36-Wasiirka Wasaaradda Deeganka iyo Ilaalinta Bey'adda: Burci Maxamed Xamza

Si kastaba ha ahaatee waxaa durba soo baxay guux dhinacyo kala duwan ka imanayey.waxaa la filayey in Dr.Cumar Cabdirashiid soo dhisi doono dawlad tiro yar oo tayo leh. Waxaase muuqatay in Isbahaysigii Garabka Jabuuti uu si weyn u qaatay xubnihii Muhiimka ahaa ee Wasiiradii la magacaabay. taaso oo iftiiminaysa in Madaxweyne Shiikh Shariif Shiikh Axmed uu soo xushay ragiisii.halka Ra'iisal Wasaare Cumar Cabdirashiid Cali Sharmarke uu ku qanacsanaa inuu noqdo soo badhige Wasiiro dhinac ah oo lagu magacaabay xukuumad midnimo qaran raadinaysa. Taas oo dadka dhaliilaa u macnaynayaan in garabkii Isbahaysiga ee Jabuuti oo ay dabada ka riixayaan qaar ka mid ah bulshada caalamku ay dawladan dhisteen.

Dhinaca kale dadka la dhacsan Xukuumada uu soo dhisay Ra'iial Wasaaraha Soomaaliaya ayaa iyagu u arka in xukuumadani tahay midii loo baahnaa ee Soomaaliya ka saari lahayd jaahwareerka siyaasadeed iyo nabadgeliyo in ka badan 18 sanadood. Ruux diidan iyo ruuxii la dhacsnba waxaa dawlada lagu magacaabay midnimadda qaran sugaya hawlo muhiim ah oo looga fadhiyo sidii wax looga qaban lahaa, waxaa jira kooxo hubaysan oo lid ku ah dawladaas iyo gobol ka tirsan Jamhuuriyadii Soomaaliya oo iayagu leh ismaamulkooda sida Puntland iyo Somaliland.

Sidoo kale waxaa Konfurta Soomaaliya inteeda badan gacanta ku haya kooxa Islaamiyiin ah oo Al-Shabaab ugu caansan tahay.

Waxaa kaloo jiray in gudigii Cull'maada eek u shirsanaa Muqdisho soo saareen Goaamo uu ugu muhiimsanaa in Ciidamadda AMISOM mudo 120 ah uga baxaan Soomaaliya iyo in la taageero Dawlada Midnimadda Qaran. Hadkan ka soo yeeray Cullmadda ayaa keeni kara marnaasho amni, iyadoo dawladda Midnimada Qaran aanay haysan ciidan la isku haylayn karo.

Waxaa kaloo durba soo baxay xubno ka mid ahaa golaha xukuumada oo ku dhawaaqay iny is casileen, ka dib markuu cadaadis kaga yimid beelahooda waxayna kala yihiin Ra'iisul wasaare ku xigeenka ahna wasiirka Shidaalka iyo Tamarta C/waaxid Cilmi Cumar Goonle iyo Wasiirka Jaaliyadaha dibadda C/llaahi Axmed C/lle (Azhari). Sidoo kale gobol ayaa lagag mudaharaaday iyadoo la muujiyey sida aan loogu faraxsanayn Xukuumadaas cusub. Isku soo wada duubo 49 Sano ka hore ayaa Cumar Cabdirashiid waxaa Aabihiis Cabdirashiid Cali Sharmarke isagoo ahaa Ra'iisul Wasaarihii ugu horeeyey ee Soomaaliya uu soo dhisay Xukuumad ka koobnayd 13Wasiir 12 July 1960-kii Wasiiradii Xukuumadiisuna waxay kala ahaayeen:-

1. Cabdi Xasan BuuniRa'iisul wasaare ku xigeen 2.. Axmed Xaji Ducaale Wasiirka Wasaarada Beeraha 3. Cali Garaad Jaamac Wasiirka Wasaarada waxbarashada 4. Cabdulllahi Ciise Maxamuud Wasiirka Wasaarada Arimaha Dibadda 5, Cabdirasaaq Xaaji Xuseen Wasiirka Wasaarada Arimaha Gudaha 6. Cabdulqadir Maxamed Aaden Wasiirka Wasaaradda Maaliyada 7. Cabdinuur Maxamed Xuseen Wasiirka wasaaradda Shaqada & Gaadiidka 8. Cali Maxamed Hiraabe wasiirka wasaaradda warfaafinta 9. Cismaan Maxmuud Ibraahim Wasiirka Wasaaraha hawlaha Guud 10. Sh.Cali JImcaale Baraale Wasiirka Wasaarada Caafimaadka iyo Xoolaha 11. Sh.Cabdulle Aw Maxamuud Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga 12. Maxamuud Axmed Maxamuud Wasiirka Wasaarada garsoorka 13. Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhiga. Markaas ayaa la is weydiin karaa Cumar Cabdirashiid ma hogaamin doonaa sidii Aabihiis xukumaad ay ka muuqato wadaninimo iyo u horseedid qaranka Soomaaliyeed meel dhan kasta kaga wanaagsan waxyaabihii ku dhowaadka Labaatanka Sano Soomaaliya ka jiray.

Jawaabtaas waxaa laga dhowrayaa waa madaxa xukuumada iyo siduu u shaqeeyo 100 maalmood ee ugu horayea Xukuumadiisa.

## Sh.Shariif :- Labo Darran Mid Dooro



Warbaahinta Dalka Liibiya ayaa ayaa qortay faalo Fariimo Sir ah oo ay hay'adda Sirdoonka ee Mareykanka CIA du soo gaarsiisey Dowladda Liibiya taasoo ay xukuumada Washington ku baadi goobayso shaqsiyadda is bad badalka badan ee Shariif Sh. Axmed oo mar wax barsho uusan dhamaystirin ku bartay Jaamacad ku taal Magaalada Tiripoli xiligaas oo uu ka mid ahaa Xogaga Guddiyada Kacaanka ee Liibiya ee iyagu faafiya aragtida Kitaabka Cagaaran ee uu qorey Hogaamiyaha Liibiya Mucamar Qadaafi.

Wararku Waxay sheegayaan in uu shariif dalkaasi ka soo tagey 1998kii markuu dhowr sano uu si joogay isagoo markii hore si tahriib ah kaga yimid dhinaca Suudaan oo uu soo jirey Saxaraha lama dagaanka ah ee kala qeybiya labada dal ee Liibiya iyo Suudaan. Arintaas oo keentay in loo diidey in uu wax ka barto Jaamacadaha Dalkaas ee Caadiga sababo la xiriira qaabka sharci darrada ah ee uu dalkaasi ku galay.markaasoo uu dib ugu laabtay Magaalada jowhar oo la duubtay hogaamiya kooxeedka maxamed Cumar Xabeeb oo kasoo horjeedey Dowladdii TNG ee C/qaasim Salaad madaxweynaha ka ahaa ee lagu dhisay shirkii Dib u heshiisiinta Carta.

Saxafadda Liibiya waxa ay qortay in Cidamada Nabad galyada ee dalka Liibiya ay u yeereen dhalinyaro joogta Taripoli oo ay wax wada baran jireen Shirrf Sh Axmed si loo helo xog ku saabsan ninkaan oo loo gaarsiiyo Mareykanka. waxaana lagu wargaliyey in hadey helaan wax ku saabsan Shariif oo ama sawirro Caadi ah, ama Sawiro Vidio ah ay soo gaarsiiyaan Ha'adaha Sir doonka.

Arintan ayaa soo baxaysa ka dib markii la soo dhisay Dowladda ay wasiiradeeda ku jiraan wadaado ay isku jaal ahaayen Shariif Sheekh Axmed iyo xubno ay aad isgu dhawaayeen C/laahi Yuusuf meeshana si xoog leh looga saarey xubnihii Dowladdii Nuur Cadde ee ay aadka isgu dhawaayeen Mareykana iyo Midoowga Yurub oo iyadu awoodey in ay ku qanciso Caalamka in Ciidanka Itoobiya dalka laga saaro.

# Xusuustii Qalinka.
# Shiikh Maxamed Macallin.



Allaha u naxariistee Shiikh Maxamed Macallin waxaa uu ku dhashay Miyiga magaaladda Buur Hakaba ee ka tirsan gobolka Bay, waxaa uu Quraanka ku aratay isla Buur-Hakaba isagoo quraanka xifdintiisa ku dhameeyey kolkuu Sagal sano jirka ahaa.

Waxaa uu Shiikh Maxamed Macalin u safray yaraantiisii magaaladda Harar halkaas oo uu mudo ku sugnaa, kana baranayeyy Culuumta Islaamka. Sanadkii 1952-dii ayuu ka bilaabay magaaladda Hargaysa Masaajidka Jaamaca ah inuu ka akhriyo Tafsiirka Quraanka. Mudo gaaban ka dib waxaa uu u safray wadanka Masar, , waxaa uu gaaray Masar 1958-dii halkaas oo uu ka galay Jaamacadda Al-Azhar.isagoo si gaar ah ugu takhasusay Usuulu- Diin gaar ahaan Caqiidada iyo Falsafadda.

Sanadkii 1968-dii ayuu dalka dib ugu soo laabtay. Waxaan lagu yaqaanay Shiikh Maxamed Macallin sidii uu ugu baraarujiyey dadka Soomaalida ah diinta isagoo ku soo can baxay Tafsiirkii Quraanka ee uu ka akhriyi jiray Masjidka Cabdulqaadir eek u yaalay Ceelgaabta magaaladda Muqdisho.

Dawaldii kacaanka iyo Hantiwadaaga ahayd ee uu hogaaminayaayey Maxamed Siyaad Barre waxay Shiikha u magacaawday inuu noqodo Agaasime arrimaha Diinta ee Wasaaradda cadaalada iyo arrimaha diinta. Macnaha laga lahaa magaacbistiisaa ayaa ahayd in Shiikh Maxmed Macalin laga mashquuliyo Tafsiirka quraanka ee uu ka waday Masjidka Cabdulqaadir. Laakiin kama mashquulin shaqada Agaasimanimadu inuu hakadgeliyo hawshii baraarujinta dadka ee diinta Islaamka. Waxaa kaloo mar loogu yeeray inuu noqdo Safiir si dalka dibadda looga saaro, taasna waa ku gacan sayray safiirnimadii loogu yaboohay.

Kaacankii Oktoobar ee dadartay qabay waxaa uu dabagal iyo ka warhayn ku hayn jiray cid kasta oo ka soo horjeeda afkaartiisa, waxaa kala hufid lagu samayn jiray shaqaalaha dawladda iyagoo la kala soocayo. Sheikh Maxamed Macaalin waxaa uu ka mid noqday xubnihii shaqaalaha dawlada ahaa ee loogu yeeray liiskii madoobaa, waxaana uu kaga qoraa numbarka Afraad.

Sheikh Maxamed Macallin laf dhabar ayuu u ahaa dhaqdhaqaaqi baraaruga islaamiga ah ee dhalanyaradii Al-Ahli. Inta badan xubnaha Al-Ahli waxay ahaayeen xubnihii uu tafsiirka quraanka ugu akhriyi jiray Masjidka Cabdulqaadir. Jan 1975-tii ayaa kacaankii Oktoobar waxaa uu soo saaray qaynuunkii loogu magaca daray Sinaantii ragga iyo dumarka (xeerkii qoyskii). Waxaa la dilay 10 ka mid ahaa culimadii diinta ee ka horyimid nidaamkii sinaanta ragga iyo dumarka. Sheikh Maxamed Macallin waxaa uu sii watay tafsiirkii quraanka, waxaana ku xiraa dad aad u fara badan oo si weyn u jeclaan qaabka tafsiirka quranka ee Shiikh Maxamed Macallin oo sidii Sayyid Qudbi-gii reer Masar tafsiirka u fasiri jiray.

Sanadkii 1976-dii ayaa Xabsig waxaa Shiikh Maxamed u taxaabay Kacaankii Oktoobar iyadoo lagu kala hayey Xabsiga Laanta Buur iyo Labaatan Jirow ilaa iyo sanadkii 1982-dii. Dhib aad u badan ayaa loogu geystay mudadii uu ku jiray Xabsiga.

Mar kale ayaa dawladii Siyaad Barre Agost 1984-tii xabsiga u taxaabay Shiekh Maxamed Macallin. Hase ahaate waxaa dawladii Kacaanka ahayd culays saray wadamo carbeed iyo kuwa islaam ah. Waana la soo daayey.

Allha u naxariiste Shiekh Maxamed Macalin waxaa uu ahaa tiir ka mid ah tiirarka baraaruga islaamiyiinta Soomaaliya. Waxaa uu ku geeriyooday Wadanak Talyaaniga sanadkii iyadoo weli lagu xasuusto kaalintiisa lama ilaawaanka ahayd ee uu baraaruga diinta ka qaatay qarnigii Labaataan ee Soomaaliya

LA SOCO CADDADKA XIGA

## Warshada Kaluunka ee Laasqoray Oo Gaadhay Hormar Fiican



Warshada Kalluunka Farsamaysa ee Laasqoray ayaa soo bandhigtay kalluun Qasacadaysan oo ah nooc cusub oo dalka gudihiisa lagu farsameeyay.

Wershada Laasqoray oo ka mid ah wershadaha ugu magaca dheer dalka somaliya ayaa Bandhig ay ku qabatay Xarunta wershada ee degmada Laasqoray waxaa ka qayb galay Ganacsato,Madax dowlada puntland ka socota iyo Dadweyne farabadan oo reer puntland ah

Ugu horayn waxa BandhigaasFuray Maareeyaha Guud ee Warshada Kaluunka Laaqoray Dr C/raxmaan Maxamed C/laahi Isaga oo si qota dheer uga hadlay Hadafka Munaasibadaasi, Maareeyaha ayaa sheegay in Ujeedka Xafladaasi uu salka ku hayo sidii Bulshada loogu soo Bandhigi lahaa, Adeegyada Warshada Laasqoray iyo Qalabka Casriga ah ee lagu soo Kordhiyay,

Maareeye waxaa intaa ku daray in Warshada Kaluunka ee Laasqoray La Balaariyay isla markaana Kaluunka lagu soo Kordhiyay Qaabab Badan oo Casri ah, C/raxmaan ayaa Xusay in ilaa 5 - Nooc loo sameeyo Kaluunka Warshada Laaqoray kaasi oo uu Yiri" Hadeer Warshada waanu Balaadhinayay anaga oo la Kaashanayay Khuburo ku xeel dheer Arimaha soo saarida Kaluunka, Waxaan soo Kordhinay Kaluun Fara badan oo si Carsi ah loo Farsameeyay, kaa soo tayo ahaan la mid ah ama ka sarreeya kalluunka Qasacaydasan ee dibada laga keeno.

Mr C/raxmaan waxaa uu hadalkiisa kusoo gunaanaday in Ganacsatada looga Fadhiyo Barnaamijkaasi Hormarka ah ka Qayb qaataan.

Masuuliyiintii kale Ee ka Halday Bandhiga waxaa ka mid ahaa Gudoomiyaha Ganacsatada Puntnd Sheekh Ismaaciil isaga ku Hadlayay Magaca Ganacsatada PL ayuu Yiri" Waan ku Faraxsanahay in aan Maanta Joogo Munaasibad lagu soo Bandhigayo Kuluunka Laasqoray Waxaan aad ugu Mahad Celinayaa dhamaan dadka lugta ku leh Mashruuca Warshada Kaluunka ee Laasqoray kuwaasi oo ah Geesiyaal ah dhabarka u ritay Masuuliyada intaasi Leg" Lama Oran karo waa wax sahla meel ay intaasi oo Ruux oo Ajaanib iyo Somali ah ka hawl Galaan" Ayuu Yiri Gudoomiyihu.

Wershada Laasqoray waxaa ka howl geli kara shaqaale gaarayaa ilaa 800 qof marka si wacan u shaqaynayso, kalluunka ay soo saarto waxaa uu dabooli karaa Baahida kalluun ee dadka somaliyeed iyo wadamada Dariska ah.

Wershada Laasqoray waxaa la dhisay Sanadii 1964-tii waxayna soo saari jirtay kalluun tayo leh.

## Biyaha Warshadeysan Oo La Digay Cabitaankooda

21,Feb,2008 Riyaadh

Dowlada Sucuudiga ayaa Digniin ka soo saaray Biyaha Warshadeysan ee ay dadka intooda badani isticmaalaan, waxayna dhistay guddi baaritaan ku sameeya qaar ka mid ah wershadaha Sucuudiga kuwaas oo farsameeya biyaha la cabo.

Dhisida guddigan ayaa ka dameeyay warbixin ka soo baxday wasaarada caafimadka ee dalka Sucuudigu. Taas oo sheegtay in 15 warshadood oo biyaha farsameeya ay jebiyeen hanaankii loo dejiyay farsamaynta biyaha la cabo taasina ay keentay in dadkii cabay uu ku dhaco cudurka Kansarka .

Waxana warbaxintan lagu sheegay in dawlado ay ka mid yihiin Maraykanka iyo midowga Yurub ay dejiyeen in wershadii ka badisa 10 Microgram oo maadada Al-awson ah halkii Liter lagu soo oogayo dembi .

Dalka Sucuudigu ayaa waxaa ku yaal 18 warshadood kuwaas oo farsameeya biyaha la cabo.

Arrintu siday doonto ha ahaatee, Dalkeena somaliya waxaa kul yaala wershado badan oo biyaha Sifeeya balse Khatarta ugu badan waxay ka imaanaysa Wershahadaha Biyaha inoo sifeeya biyaha la cabo kuwas oo badankood aysan la iman dad khibrad u leh farsamaynta biyahan,waxaa kaloo jirin wasaaradii Caafimaaka oo shaqadeedu ahayd Hubinta dhamaan waxyaalaha la farsameeyo iyo cuntooyinka laga keeno waadamada Dibada.

## Markab ka Diiwan Gashan Malta Oo la Afduubay

Ilays, 23,feb,2008

Markab Xamuulka Qaad oo Laga leeyahay Dalka Griiga balse ka diiwan gashay Wadanka Malta ayaa 22 bisha februey Burcad Badeed Somalia ku afduubtay Xeebaha Gacanka Cadmeed.Markabkan oo Lagu Magacaabo MV Saldanha ayaa siday dhuxul dhagax, waxaana uu ku sii jeeday dalka Slovinia ee Qaarada Urub.

Markab Dagaal oo Ingriis oo lagu Magacaabo HMS Northumberland oo u jiray 100 km ayuu la soo xiriiray Kabtanka Markabka la afduubay, hase yeeshee waxaa uu u sheegay inuusan waxba u qaban Karin.

Bishii September ee 2008 ayay Burcad badeed Somalia ahi afduubtay Markab MV Centauri oo sitay Calanka Malta.oo ay saarnaayeen 18 shaqaale u dhashay wadanka Filipino, waxaana la sii daayay shaqaalahaasi November 28, 71 maalmood ka dib.

# Koboca Islaamiyiinta Somalia

## *( Siraha Qarsoon )*

## *Khilaafkii Gama'sanaa ee Islaamiyiinta Dhexdooda*

**Qormadii 8aad**

Sanadkii 1977-kii waxaa isbedel weyni ku dhacay wajigii ururkii Al-ahli kolkii laga saaray Shiikh Maxamed Garyare, Dr.Cali Shiikh Axmed, Maxamed Yusuf iyo xubna kale, ururkiina fikradda Takfiirimada ayaa soo dhexgashay. wuxuu u qabsamay sadex qaybood

• Jamaatul Muslimiin (Takfiir) oo uu hogaminayay madaxii ururka Al-ahli Sheikh Cabdulqaadir Sheikh Maxamuud. Dhaqdhaqaaqan ayaa soo baxay kolkii Masar aad loogu ciqaabay, welibana in badan oo islaamiyiinta ah la daldalay. Arimaahaas ayaa dareen ku raabay dhalinyaro badan. Waaa dhaqdhaqaaqan sal dhigay Shiikh Cali Ismaaciil Sheikh Shukri Mustafa oo u dhashay Wadanka Masar.

• A-Islaax urur ay asaaseen qaar ka mida xubnihii ururka Al-ahli laga saaray oo ay hormuud u ahayn, Shiikh Maxamed Garyare, Dr.Cali Shiikh Axmed,waxayna la baxeen Al-Islaax Al-ahli intii takfiir ka soo hartay waxay asaaseen urur la magac baxay Jamaaca islaamiyaالجماعة الإسلامية. Waxaa kol hogaamiye u noqday Ustaad Maxamuud Ciise iyadoo uu ku xigeena u ahaan jiray Maxamed Cabdi Daahir. Waxaase marmar la sheegaa inuu Madax Jamaaca Islamiya mudo gaaban u ahaa Shiikh Cabdicasiis Faarax oo isagu markii dambe uga tanaasulay hogaamintii Ustaad Maxamuud Ciise hogaamiyihii Jamaaca islamiya.

Waxaa wadanka ku soo noqday xiliyadaas Shiikh Cabdicasiis Faarax oo ka yimid Sudan, waxaana uu aad u iftiimiyey khatarta kooxdan diineed ee loogu yeero Takfiirka isagoo soo bandhigay kitaabaday ka qoreen cullimadda Islaamka ee caalamku. Waxaa ururka cusub ee Jamaaca Islaamiya qaatay dhabihii aragtida Salafinimadda. Waqooyiga Soomaaliya waxaa ka jiray ururu Islaamiya oo la oran jiray Waxdada.

Bilowgii Sanadkii 1978-kii ayaa noqday Sanad ku kowsaday khilaafka Islaamiyiinta Soomaaliya u dhexeeyaa iyo asaasid ururuo Islaamiyiin ah oo xanbaarasan fikirka Islaami Siyaasi. Waxaa la is weydiin karaa maxaa sal u ah khilaafka Islaamiyiinta?

Ustaad Cabdiraxmaan Baadiyow ayaa sharxaya:-

" Waxaa sal u ahaa khilaafkaas ku fashilmidda xarakooyinka Islaamka ee sameynta hal urur Islaami ah oo Soomaliya yeelato. Waxaa la dhihi karaa in kala qeybsanaanta dhallinyarda baraaruga Islaamka(Al-Ahli) ay sabab u ahaayeen xornimo la'aanta, qarsoodida, waayo aragnimo yarida iyo qaadashaha fikradaha iyo manhajyada kale duwan ee caalamka Islaamka ka jiray sida Ikhwaanka, salafiyada iyo fikirka takfiirka"

Waxaa soo bixi karta su'aal kale oo ah. Biloowgoodi Islaamiyiintu fikirkee ku hiranayeen. Waa kan Ustaad Cabdiraxaman Baadiyoow oo iftiiminaya mar kale.

" Waxaa xusud mudan in bilawgii xarakada Islaamka ee Somaliyeed uu sal u ahaa fikirka Ikhwaanka, kaas oo siyaabo kala duwan ku soo gaaray Somaaliya. Laakiin, Saameynta ugu weyn waxaa lahaa kutubtii ikhwaanka ee maktabadda Wasaaradda Arimaha Diinta ay dhigeen Sheikh Cabdiqani Shiikh Axmed iyo Shiikh Maxamed Garyare oo ka tirsanaa Xarakada Ikhwaanka. Waxaa kaloo door weyn lahaa tafsiirkii Shiikh Maxamed Macalin ee ku saleysnaa Daliilka Qur'aanka ee Sayid Qutubi ee Masjidka Shiikh Cabdulqaadir."

Ikhwaanul Muslimiin waa dhaqdhaqaaq Islaami ah oo ku dhegan islaamka iyadoo kitaabka iyo sunaha Rasuulka la raacayo. Asaasaha dhaqdhaqaaqan ayaa ahaa Xasan Al-bana oo ku asaasay magaalada Ismaaciilay Wadanka Masar Aprile 1928-kii.

Aragtida ah in fikirka Ikhwaanul Muslimiinku sal u ahaa ku hirashada soo bixitaankii baraaruga Islaamiyiinta Soomaaliya ayaa su'aal la iska weydiin karo ah. Aqoonyahano badan oo wax ka qora arrimaha xarakooyinka islaamiyiinta Soomaaliya ayaa tibaaxaya oo qaba in fikirka salafinimadda uu kaga soo horeeyey Soomaaliya kan Ikhwaanka xilliga baraarug oo uu .tusaale u ahaa Shiikh Nuur Cali Colow oo salafinimadda si weyn ugu ololeeyey, dadkana kala dagaalamay dhaqamadii gabowga ahaa ee shirkinimada wax u horseeday bartamihii kontomaadkii ee qaranigii Labaatanaad

Sheikh Nuur Cali Colow ayaa waxa uu ka tirsanaa Jamaaatul Ansaarul Sunaha Al-Muxamadiya oo uu asaasay Shiikh Maxamed Xamid magaalada Qahira ee Masar Dec 1926-kii. Dhaqdhaqaaqan ayaa ah mid salafinimada ku dhegen isla markaana si weyn u la dagaalama khuraafiga iyo waxyaabaha ku lamaan. Shiikh Nuuur Cali Colow ayaa intuu uuu Masar joogay aad ugu xiraa dhaqdhaqaaq Jamaaatul Ansaarul Sunaha Al-Maxamadeya.Isagoo fikirkaas u soo safriyey dhinaa Soomaaliya bartamahii Kontomaadkii.

Waayihii Horu-socdka Islaamiyiinta Soomaaliya.

Afgembigii fashilmay ee Aprile1978-dii ee la doonayey in awooda looga tuuro si xoog ah hogaamiyihii hore ee Soomaaliya Jalle Maxamed Siyaad. Ayaa bilow u noqday mucaaradkii hubaysanaa ee Itoobiya kaga soo duulayey Soomaaliya. Mucaaradkaasi waxaa uu baal cusub u faray siyaasadda iminka jirta ee ah in Itoobiya noqoto hoyga lagaga soo duulo Soomaaliya. Oo uu awal u dhexeeyey xayndaab adag. Isku milanka labada dal ee dhinac walba. Waa tan ay iminka ku shaqaynayso siyaasadda dawladda uu madaxda ka yahay Males Zanaawi.

Hogaamiyihii hore ee Itoobiya Mingistu Xayla Maryam ayaa ka jeediyey khudbad taariikhda gashay fagaaraha magaaladda Adis-abab 01 Maarso1978-dii isu soo bax lagu xusayey maalintii Itoobiya dagaalka ku jebisay Talyaaniga Adwa 01 Maarso 1896-kii wuxuuna yiri.

" Maanta dagaalkii Jabhadda (Soomaali Galbeed) iyo Militariga Soomaaliya ku soo qaadeen Itoobiya waa dhamaaday. Itoobiya ayaa guulaysatay. Waxaa mahad leh Midowga Soofiyetka iyo Kuuba iyo saxiibadda kale oo wax walba u huray inay Itoobiya badbaadiyaan la'aantoodana guushaas lama gaaareen. Laakiin dagaalku ma dhamaan, waxaana uu hadda ka dib ka socon doonaa gudaha Soomaaliya."

Hadalka Mingistu Xayle Maryam ayaa lagu macnayn karay inuu ula jeedo jabahada mucaaradka ku ahaa dawldii Soomaaliya ee uu madaxda ka ahaa Jalle Siyaad. Inay noqon doonaan kuwa iyagu dalkooda hooyo dagaalka ku qaadi doona iyo in weliba qabiil qabiil Soomaalida la iska horkeeni doono si ay awooda isugu qabsadaan. Waayo waxay keliya ee Soomaalidu si dhab ah u aaminsan tahay ayaa ah qabiilaysiga.

Dagaalkii 1977-kii ee Soomaalidu la gashay wadanka Itoobiya kama marnayn in xooggaagii dagaalamayey ay ku dagaalamayey si jihaad ah isla markaana fulinayeen qodob diimeed ah xoraynta dhulka Islaamka ee la haysto (Ogaadeenya).

Saraakiisha ka tirsanaa Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee ka qayb gashay dagaalkII Ogaadeenya ayaa in badan oo ka mid ahaa waxaa saaqday saxan saxada dabaysha diinta. Kuwaas oo ku hamiyeey inay Soomaaliya u horseedaa dawlad Islaami ah. Waxaa xubnahaas ka mid ahaa Shiikh Xasan Daahir Aweys iyo rag kale. Xunaha ka mid ahaan jiray Ciidankii Xooga Dalka Soomaaliyeed ee sida weyn uga qayb qaatay ku baraarujinta Islaamka bulshadda Soomaaliyeed waxaa ka mid ahaa Shiikh Maxamed Cali Dahir oo door muhiim ah ku yeeshay kobcinta Islaamka waqtiyadii dambe.

Shiikh Xasan Dahir Aweys ayaa ka mid ahaa Xarakadii Al-Ahli oo isaga waqti dambe lagu soo daray. Maadaama uu ahaa sarkaal ka mid ahaa ciidamadii qalabka sida ee Soomaaliyeed. Mudo ayaa hangool laga hayey ka mid noqoshada dhaqdhaqaaqaas Islaamiga ahaa. Inkasooy laba walaalihiisa oo ahaa Axmed Dahir Aweys iyo Cabdiraxmaan Daahir xubno ka ahaayeen Al-ahli.

Dhaqdhaqaaqyada islaamiga ah ee Soomaaliya ka jiray waxaa xubno ka noqday saraakiil dhalinyaro oo ka tirsanaa ciidamada dalka. Kuwaasoo u diyaarsanaa suurta gelinta in islaamiyiintu haddii loo baahdo awood ciidaan dalka ku qabsadaan. Saraakiisha dhalinyarada ahaa ee wax ku soo bartay kulliyadaha ciidamada ee wadamada carbeed sida Masar, Sudan iyo Ciraaq ayaa waxaa ku jiray dareen u nuglaasho dhaqdhaqaaqyada islaamiga ah. Walow uu dhinaca kale uu jiray dareen ka imanayey ururada islaamiyiinta oo shaki gelinayey in si fog loo aamino xubnaha ka tirsanaa ciidamadii kala duwanaa ee Soomaaliya.

W/Q:- C/shakuur Mire Aadan

LA SOCO CADDADKA XIGA

# Somaliya: Sun Ma lagu Aasay? ''Maxaa Loo dilay Ilaria Alpi'

**Qaybta 5aad**
**Tarjumadii: SomaliTalk.com | Janaayo 2009**

In la helo dil ka dhacay Soomaaliya ayaa waxay xanibeysaa in baaritaanka hore loo sii wado oo meel sare la gaarsiiyo, si loo baadi goobo kuwii ka dambeysey bixinta amarkii lagu diley weriyaasha, ayey tiri warbixinta TV-gu.
Qareenka Qoyskii Alpi, Domenico D'amati, ayaa yiri:

"Waxay taasi ahayd isku day la doonayey in kiiska dacwaddaas lagu xiro,"
isagoo intaas raaciyey in ay jiraan dad arrintaas og iyo "in weli baaritaanku weli socdo." Sidoo kale Alpi hooyadeed waxay tiri taasi waxay ahayd

"Maqaar saar (qofka oo eed uusan lahayd dusha laga saaray) si dhammaantayo lanoo aamusiyo".
Baaritaanka la xiriira dilkii Ilaria Alpi iyo Miran Hrovatin ee Muqdisho weli waa socotaa, ayey tiri warbixintu, iyadoo intaas ku dartay: Waxaa weli maqan lix (6) ka mid ah toddoba dilayaal ah iyo kuwii bixiyey amarka dilitaanka. Xaashi Cumar Xasan waxa uu rajaaynaya in maxkamadda dib loo saaro markale iyadoo arrinta lagu samaynayo Jeelle oo markhaanti furkiisii laga dhigayo waxba kama jiraan.

"Dadkii Soomaalida ahaa oo ay shalay baqdintu haysey, maanta ma cabsanayaan, oo waxaana dhici karta in ay diyaar u yihiin in ay hadlaan," ayuu yiri Qareenka Xaashi.

Weriye Alpi iyo sawir-qaadaheedu waxay Soomaaliya u tageen in ay baaritaan ku sameeyaan Haraadiga Sunta Halista ah (rifiuti radioattivi) ee lagu duugay dhulka Soomaalida, waxayna doonayeen in ay akhbaarta ay helaan u soo bandhigaan indhaha shacabka, sidaas waxaa sheegay warbixinno badan oo la qoray kaddib dilkii Muqdisho lagu diley weriyaashaas.
Haddii la dilo weriye, waxaa jiri doona weriye kale oo isku dayi doona in la ogaado wixii dhacay. Taasi waa in ay digniin u ahaato qof kasta oo u malaynaya in akhbaarta la is hor taagi karo haddii la dilo weriye. Kuwaasi waa khaldan yihiin," ayuu yiri Maurizio Torrealta, oo kamid ahaa weriyaashii la shaqayn jirey Alpi.
Soomaaliya xilligan waa Qaran Burbursan, laakiin mustaqbalka waxay Soomaaliya Qaan Ku Sheegan kartaa in si Caalami ah loogu adeegsadey in lagu duugo Haraadiga Sunta Halista ah, ayey tiri warbixinta TV-gu.

Giampiero Sebri oo sida aan soo xusnay ka mid ahaa ragga sunta halista ah u soo dhoofiyey Soomaaliya, waxa uu sheegay in kooxaha sunta daabula ay weli firfircoon yihiin oo ay hawl galaan. Isagoo arrintaas ka hadlayey Giampiero Sebri waxa uu yiri:

"Ururada (sunta duuga) weli si firfircoon ayey u hawl galaan. Haddii aysan weli si toos ah sunta u duugin, waxay u hawl-galaan sidii iyagoo ah la taliyaal."

Gabagabadii warbixinta Telefishanku waxay is-weydiisey
"Xaggee Suntaa Halista ah ku dambeysey."

Waxaa markaas la is tusay Haamo aan la aqoon waxa ku jira oo ku soo caariyey xeebta,

"Soomaalidu (arrimahaas Sunta) waa ku baraarugsan yihiin, laakiin maxay qaban karaan," ayuu yiri Luciano Scalettari oo booqday wadada isku xirta Boosaaso iyo Garoowe. Waxana uu intaas ku daray in si xaqiiqo ahaan loo ogaado ay muhiim tahay in ugu yaraan hal meel la soo faago sunta si aan markaas u niraahno "Waa Tan Suntii" lagu duugey Soomaaliya oo xaqiiqo ah.
Warbixintaasi waxay si qeexan u muujisay in Soomaaliya lagu duugey Haraadiga Sunta Halista ah, taas oo raad weyn oo xagga caafimaadka ah ku reebeysa mujtamaca Soomaaliyeed muddo dheer.

Haddaba inta aynaan u gudbin dhibaatooyinkii la diiwaan geliyey ee soo wajahay dadka Soomaaliyeed ee sababtay Suntii la aasay intii u dhaxaysey 1992 ilaa 1998, waxaan ku hakan doonaa wixii ku qornaa Wareegtadii Cali Mahdi Maxamed ku ogolaaday in Haraadiga Qashinka Sunta lagu duugo Dhulka Soomaaliyeed iyo Baarlamaanka Talyaaniga oo waraystay Cali mahdi iyo wixii uu ku jawaabe Aqalka Baarlamaanka ee looga Taliyo Dalka Talyaaniga ayaa Baaritaan Dheer ku sameeyey Sunta Halista ah ee lagu duugey dalka Soomaaliya iyo xiriirka ka dhexeeya dilkii weriye Alpi & sawir-qaadaheedii oo Muqdisho lagu diley 20 March 1994. Intii baaritaankaasi socdey ayaa guddi arrintaas loo xilsaaray waxay 7-dii September 2005 waraysi dheer la yeesheen Cali Mahdi Maxamed. Waxaana taas garab socdey xog farabadan oo ay soo Ururiyeen Hay'adaha Sirdoonka Talyaaniga ee "SISDE" (madaniga) iyo SISMI (militariga).

Cali Mahdi waxaa ugu horayn wax laga weydiiyey dagaalkii Muqdisho, Maxamed Faarax Caydiid, Ciidamadii UNOSOM, in safiirkii Soomaaliya u fadhiyey Pakistan Cabdi Xaaji Axmed Liibaan oo u ololaynayey in Dunida Muslimka uu tuso in dagaalka Caydiid kula jirey UNOSOM uu ahaa dagaal Jihaad ah, Bililiqadii ka dhacday Muqdisho iyo Jabhadahii sida USC, SNF iyo SSDF, Ururkii Al-Itixaad-Al-Islaam, Kala qaybsanaantii Waqooyiga-iyo-Koonfurta Muqdisho iyo arrimo la xiriira maamulkiisii.
Markii la weydiiyey
"Aan ka hadallo Giancarlo Marocchino".

Waxa uu Cali Mahdi durbadiiba sheegay in xaaska Marocchino ay tahay gabar uu dhalay qof qaraabo la ah isaga (Cali Mahdi). Markaas ayaa la weydiiyey: waa maxay xiriirka aad la lahayd Mr. Marocchino? Ma xiriir Gacasi, Siyaasad, Akhbaar, Saaxiibtinimo, Qaraabanimo, ama faa'iido wadaag? Waxa uu Mahdi ku jawaabey

"Xiriir Saaxiibtinimo maadaama uu ku noolaa aagga."

Markii la weydiiyey cidda uu ninkaasi u shaqayn jirey, Cali Mahdi waxa uu ku jawaabey
"Inta aan ka ogahay waxa uu ahaa gaadiid-le wax-rara (trasportatore = carrier)."

Giancarlo Marocchino waa nin dhalashadiisu tahay Talyaani oo intii u dhaxaysay 1992 ilaa 1996 ku noolaa Degmada Kaaraan ee magaalada Muqdisho isagoo difaac ka haystey Cali Mahdi. Mr. Marocchino waxa uu lahaa gawaari waaweyn iyo aaladdaha lagu qodo godadka, taas oo loo malaynayo in uu ku qoday godad lagu duugo Sunta Halista ah. Mr. Marocchino waxaa la sheegay in uu gacan ka geystey dhismihii dekedda Ceel Macaan oo ku taal xeebta u dhaw Muqdisho.

Waxana jira warbixinno muujinaya in Giancarlo Marocchino uu Muqdisho gurigiisa ka dhigtay ilaa sannadkii 1984 xilligaas oo uu ka soo cararay Talyaaniga eedayn la xiriirta is-daba marin Cashuurta awgeed. Waxana uu guursaday haweeney Soomaaliyeed oo ka soo jeeda aagga Waqooyiga Muqdisho. Waana ninka warbixinno badan ay farta ku fiiqeen in uu ka mid yahay dadka Sunta ku Duuga Soomaaliya

Sannadihii ahaa 1980-naadkii, xisbigii Hantiwadaagga ee Talyaaniga oo uu hoggaaminayey Bettino Craxi waxa uu u muuqdey mid dawladda Talyaaniga ka dhigay mid dhammaanteed ah musuqmaasuq lacageed - dalkii ay hore u gumaysan jireen ee Soomaaliya ayaa door weyn ka ciyaaray fulinta musuqmaasuqaas. Lacag xad-dhaaf ah oo gaareysa Trillions Liire ayaa loo diray dalka saboolka ah ee Soomaaliya iyadoo loogu magac daray "mucaawino", waxaana lacagtaas si dadban dib loogu celiyey jeebka madaxda sare ee dawladda Talyaaniga iyo jaalkooda. (Qaar musuqmaasuqa ah waxa uu soo shaac baxay sannadkii 1989 kaddib markii Gen. Maxamd Faarax Caydiid - intii uusan ku soo shaac bixin qabqablaha dagaal - uu ra'iisul wasaarihii Talyaaniga Craxi ku dacweeyey in uusan siin 50 million lire oo uu hore ugu ballan qaaday oo ahayd laaluush). Khiyaamadii ugu waynayd ee mashruucii deeqda Soomaaliya waxa ay ka dhacday Waqooyi-Bari, aagga Boosaaso. Mid ka mid ah mashaariicdaas waxa uu ahaa dhismihii dariiqa Boosaaso ku xiriiriya jidka laamiga ah ee Soomaaliya inteeda kale. Dadka mashruucaas jidkaas faa'iidada ugu weyn ka helay, oo sida musuqmaasuqa lacagta xad dhaafka ku helay, waxa uu ahaa nin aad ugu firfircoonaa ganacsiga la xiriira gawaarida qaadda xamuulka, ninkaasi waa Giancarlo Marocchino." Sidaas waxaa qoraal dheer ku qoray Michael Maren warbixtiisii Muqdisho 1994.

Barnaamij laga sii daayey Telefishanka Dawladda Talyaaniga ee RAI oo ka warbixinayey telefoon loo soo diray weriyaashi lagu diley Muqdisho ka hor intii aan la dilin, ayaa soo bandhigay sawirro muujinaya in goobtii dilku ka dhacay daqiiqado yar ka dib uu yimid Giancarlo Marocchino, sida lagu muujiyey sawiro TV-ga Waxaana warbixinta lagu xusay ninkaas Talyaaniga ah oo joogey Waqooyiga Muqdisho. Waxaana markaas la sheegay in dadkii dilka qorsheeyey ay isugu jireen muwaadiniin Soomaali iyo muwaadiniin Talyaani ah, maadaama ay dhici karo weriyuhu ay heshay xog ku saabsan Sunta Halista ah oo la doonayey in aan la ogaan, sidaasna loo khaarijiriyey weriyaasha.

*LA SOCO CADADKA XIGA*

# Telcom Puntland

Bosaso, Somalia



Ku xidhnow
TELCOM
Always Connected





Shirkadda Telcom Punland oo ku soo kordhisay adeega GSM-ka (Mobile-ka) Features Casri ah

| | |
|---|---|
| *Garaac si aad u dalbatid adeegyada TELCOM-PUNTLAND* | *141* |
| *Riix si aad ugu darsato numberadda Family-ga (FN)* | *146* |
| *Riix si aad u Dalbato adeega numberada ku gafay (Missed call)* | *144* |
| *Riix si aad u ogaato lacagta kuugu jirta* | *221* |
| *Riix si aad lacag ugu shubato* | *222* |
| *Riix si aad u la xiriirto qaybta adeega macaamiisha* | *143* |
| *Riix Si aad Qof kale lacag ugu shubto* | *333* |

***QORAAL AHAAN***

| | |
|---|---|
| *Riix si aad Lacag ugu shubato* | **141*pin#* |
| *Riix si aad u ogaato lacagta kuugu jirta* | **142#* |
| *Riix si aad lacag u xawishid* | **143#* |
| *Riix si aad u bedesho password ka* | **156#* |
| *Riix si aad u ogaato Numberkaaga* | **145#* |
| *Riix si aad u dalbatid deyn* | **149#* |
| *Riix si aad u ogaato lacagta dheeriga ah* | **146#* |

*•Divert all incoming calls : * 2 1 * (Phone Number) # ok*
*•To Divert when no response: * 6 1 * (Phone Number) # ok*
*oIn case of no access or busy * 6 2 * (Phone Number) #ok*
*•Qaabka loo joojiyo Forwarding-ka Si aad u joojiso Forwardingka isticmaal # 21 # ok*
*•Qaabka lacagta loo xawilo adiigo isticmaalaya qoraal*
**143#Password Number*1* 252 your number#*
*•Qaabka loo badasho Password *156#Old Password#New Password#*

**Shirkadda Telcom puntland waxay ugu bishaaraynaysaa macaamiisheeda in ay ku soo kor dhisay Landline-ka Features noocii ugu danbeeyay ee dunida laga isticmaalo manta,shirkadda Telcom Puntland waxay kaloo ku sahashay in landline-ka shirkadda aad u isticmaali kartid in aad lacag la'aan ku wacdo goboloda puntland oo dhan**

**Shirkada Telcom Puntland xarunteeda weyn waxay ku taal magaalada Boosaaso, waxaana shirkadu ay xarumo ku leedahay dhamaan gobolada iyo degmooyinka dalka Wixii Faahfaahin ah:Tell: Tel: 002524500007 AMA 143 OO AH QAYBTA QANCINTA MACAAMIISHA**

## www.telcompuntland.com

mark-dep.telcom@hotmail.com

## HORYAAL PRINTING CENTER

**ADEEGYADA DAABACADEED EE HORYAAL DIYAARKA KUULA TAHAY**

- Buugta Akhriska
- Buugta libka & Adeegyada Bulshada
- Receipt Vouchers
- Payment Vouchers
- Invoices
- Cash Sales
- Daily Sheets
- Business Cards
- Envelops
- Stickers
- Prescription
- Register Books
- Text Books
- I.D Cards
- Certifications
- Flyers
- Invitations Cards

***KADALBO HORYAAL DOOKHAAGA DAABACADEED WAQTIGA AAD RABTO, SIDA AAD U RABTO & QIIME KURAALI GALIYA***

Wixii faahfaahin ah kala xiriir

Tell :- 824299/796169/726169

BOSASO SOMALIA